Macluumaad ku saabsan sharciyada khuseeya fasaxa laga qaato dugsiga waxbarashada marka loo safrayo wadanka dibadiisa oo loogu talo galey waalidiinta

Ardeyda dhigata fasalka barbaarinta (förskoleklass), dugsiga hoose/dhexe ama dugsiyda hoose/dhexe ee gaarka ah ee loogu talo galey ardeyda qabta baahiyaha gaarka ah (grundsärskola)

Waxbarashada khasabka ah iyo xuquuqda waxbarashada

Dhamaaan carruurta ku nool wadanka Iswiidhen, waxaa waajib ku ah sida uu qabo sharciga waxbarashada khasabka ah, laga bilaabo marka uu ilmuhu buuxiyo 6 sano ilaa inta laga gadhayo da'da lagu dhameeyo waxbarashada dugsiga hoose/dehex ama dugsiyda hoose/dhexe ee gaarka ah loogu talo galey ardeyda qabta baahiyaha gaarka ah (grundsärskola). Waxbarashada khasabka ah waxaa ay macnaheedu tahay in ay waajib ku tahay in uu ardeyga ka qayb qaato waxbrashada. Dhanka kale, dhamaan ardayda uu qabanayo sharciga waxbarashada khasabka kale waxaa ay xaq u leeyihiin in ay helaan waxbarasho. Ardaygu waxaa xaq uu in uu dhigan karo dugsi waxbarasho oo ku yaala degmada uu degan yahay ama degmo kale. Waxaa uu dugsigu noqon karaa dugsi ay degmadu leedahay ama dugsi ka mid ah dugsiyada si gaar loo leeyahay.

- In ardeyga ay waajib ku tahay in uu ka qayb qaato waxbarashada khasabka waxaa ay macnaheedu tahay in ay adiga ka waalid ahaan ku saarantahay mas'uuliyad ah in aad u suurto galiso in uu ilmahaagu ka qayb qaato waxbarashada.
- In uu ardeygu xaq u leeyehay in uu helo waxbarasho waxaa ay macnaheedu tahay in degmada uu ka diiwaan gashanyahay ilmuhu ay saarantahay waajib ah i dhamaan ardeydu ay helaan boos dugsi ay ka helaan waxbarasho.

Ma khasab baa in ay labada waalidba wada saxeexaan?

Sidan hoos ku xusan bey wasaarada waxbarashadu kaga jawaabtey su'aasha:

Sharci dajiyaashu waxaa ay ka dulayaan in labada waalid ay heshiis ku yihiin ilmaha, sidaa aawadeed kama hadlayo sharcigu sida loo wajahayo xalinta arinkaas haddii labada waalid aysan heshiis ku aheyn arimaha ku xeersan ilmaha. Go'aanka dugsiga waxbarsahada ee ku aadan fasaxa waxaa uu ku sal ama gundhig u ahaan doonaa ujeedada loo qaadanayo fasaxa. Haddii labada waalid aysan heshiis ku aheyn qaadashada fasaxa, dusiga waxbarshadu dhexdhexaad buu ka ahaan doonaa khilaafka u dhaxeeya labada waalid. Ma aha khasab in labada waalidba ay ogolaadaan codsashada fasaxa, laakiin waxaa muhiim in labada waalidba ay ka helaan dugsiga waxbarashada macluumaad isku mid ah oo ku saabsan fasaxa.
Laakiin waxaa ay degmadu leedahey sharci odhanaya, fasaxayada la siiyo ardeyda uu qabanayo shariciga waxbarashada khasabka ah waxaa loo baahanyahay in labada waalidba laga heleo ogolaansho laga bilaabo maalinta fasaxa ee 11-aad muddada lagu gudo jiro sanad dugsiyeedka, maadaama loo baahanayahay in ay jirto sababo aad khaas u ah si fasaxa la siiyo ardeyda laga bilaabo maalintaas.

Fasax

Mararka qaarkood waxaa ardeydu u baahdaan in ay ka maqnaadaan dugsiga waxbarashada sababo kala duwan aawadood. Hadaba si uu dugsiga waxbarashada ee uu ardeygu dhigto u go'aamin karo in loo ogolaado ardeyga fasaxa iyo in kale, waxaa loo baahanyahay in uu waalidku u keeno macluumaad ku saabsan sababta uu ilmuhu uga maqanaan doono dugsiga waxbarsahada.

Sharciga dugsiyada waxbarashada waxaa uu sheegayaa in ardeyga loo ogolaan koro fasaxyo gaagaaban sii uu uga qayb karo arimo shaqsiyadeed oo u gaar ah qoyska. Waxaa uu tusaale ahaan fasxayadaasi noqon karaan fasax si uu u booqan karo dhakhtarka ilkaha ama maqnaansho maalmo kooban sababo la xidhiidha ciidaha qoyska, safar iyo waxyaabo kale oo la mid ah. Fasaxyo kooban waxaa loola jeeda ugu badnaan toban maalmood sanad dugsiyeed kasta.

Haddii ardeygu uu qaatey isku geyn 10 maalmood oo fasax ah muddada lagu jiro sanad dugsiyeedka isla markaana aad soo codsataan fasax kale oo dheeri, waxaa loo baahanyahay sida uu qabo shariciga dugsiyada waxbarashadu in ay jirto sababo gaar ah oo aad muhiim u ah si loogu ogolaan karo ardeyga fasaxaas. Tusaale

ahaan in safar fasax ah loo baxo looma arko in ay tahay sabab gaar ah oo aad muhiim u ah.

Waxaa dhici karta in codsiga fasax la diido xitaa isaga oo aan ardeygu hore u qaadan wax fasax ah, hadii tusaale ahaan wakhtiga fasaxa la codsadey ay ku soo aado wakhti ay ardeyag ku soo fool leeyihiin imtixaanada shahaadiga (nationelle prov). Ma haboona in wakhtigaa loo ogolaado in ardeygu fasax galo.

Safarda wadanka dibadiisa

Mararka qaarkood waxaa dhacda in qoysasku ay safar muddo dheer qaata ay ku tagaan wadanka dibadiisa. Waxaa markaa dhacda in ardeygu dhigto dugsi ku yaala wadanka dibadiisa, laakiin marar dhif ah oo safarka loogu baxayo wadanka dibadiisa ay qaadneyso muddo dheer ayaa waalidiin ay arinkaas sameeyaan. Waxaa muhiim in la ogaado in degmada Uddevalla aysan marnaba bixin kharashaadka (skolpeng) ku baxa waxbarashada wadanka dibadiisa.

Maadaama ardeyda uu qabanayo sharciga waxbarshada khasabka ah marka la joogo wadnka Iswiidhen, waxaa looga baahanayhay waalidka macluumaad aad u badan si aan u helno gundhig nagu filan si la gaadho go'aan ku saabsan sidii loo maareyn lahaa marka uu ilmuhu ku suganyahay wadanka dibadiisa iyo waliba nooc go'aanka la gaadhi doono uu noqonayo.

Waxaa aan u baahanyahay cadeymo qoraal ah oo muujinaya muddada aad ku maqnaan doontiin wadanka dibadiisa, cadeyn muujineysa meesha aad dagi doontaan, sababta aad ugu safreysiin wadanka dibadiisa, cadeyn laga keeno dugsiga waxbarsahada ee uu ilmuhu dhigan doono, haddii uu ilmuhu dhigan doono dusiga waxbarashada iyo waxyaabo kale oo badan. Haddii uusan ardeygu dhigan doonin dugsi waxbarasho muddada aad ku suagantihiin wadanka dibadiisa, waxaa loo baahanyahay in aad sharaxdaan sida uu ardeygu u heli doono waxbarashada uu xaqa u leeyahay.

Markaa ka dib qof go'aan gaadhe ah ayaa sameyn doona qiimeyn ku saleysan macluumaadka iyo cadeymaha aad keenteen. Haddii aan markaa helno cadeymo muujinaya in uu ardeygu uu ku maqnaan doono wadanka dibadiis muddo ka badan 6 bilood oo xidhiidh ah (wakhtiyada la dhigto dugsiyada – laakiin aysan ku jirin fasaxa waktiga xagaaga iyo fasaxa wakhtiga ciida masiixiga), waxaa markaa baaba'aya ama meesha ka baxaya waajibkii waxbarashada khasabka ee wadanka Iswiidhan isla markaana waxaa laga saari soona liiska dusiga waxbarashada ee hadda ka tirsanyahay. Marka uu ardeygu wadanka dib ugu soo laabto waa in la sameeyaa codsi cusub si uu dugsiga waxbarshada uga helo boos cusub. Lama hubo ama lama qaadi karo balan in uu ardeygu dib ugu soo laaban karo dugsigii waxbarashada iyo fasalkii uu hore uga tirsanaa.
Haddii muddada lagu maqnaanayo wadanka dibadiisa ay ka yaraato muddo 6 bilood ah, waxaa markaa wali waajib ku ah waxbarashada khasabka ee wadanka Iswiidhen. Si aan ugu ogolaan karno fasaxa, waa in aan marka hore go'aan ka qaadano in waxbarashada ardeygu uu ka heli doon dugsi ku yaala wadanka dibadiis ay buuxin karto shuruudaha sida waafaqsan xeerasha jira.

Waxaa loo baahanyahay in la buuxiyo shuruudaha sid uu qabo shariga waxbarshada:

- In dugsiga waxbarahsda uu yahay ama u muuqado mid si buuxda ugu dhigmi kara waxbarashada uu ilmuhu ka heli lahaa wadanka Iswiidhen
- In la dabooli karo baahida loo qabo daah furnaata hawlah dusiga iyo waliba
- In ay jiraan sababo gaar oo muuqda oo siyaabo kala duwan ugu ogolaanaya ardeyga in uu gudan kato waajibkiisa waxbarashada khasabka ah

Haddii safarku uu yahay kaliya fasax dheer isla markaan aanu ardeygu heli doonin waxbarasho, waxaa markaa la cusanka doonaa ama lagu dhaqmi doono xeeka fasax qaadashada.

Gabagabo

Ardeyda ka diiwaan gashan wadanka Iswiidhen waxaa qabanaya sharciga waxbarshada khasabka ah iyo sharciga xuquuqda waxbarashada. Waa in uu dugsiga waxbarshadu mar kasta oo la sameynayo qiimeyn in ardeyga loo ogolaado fasax iyo in kale tixgaliyaa arimahan hoos ku xusan:

- Muddada wakhtiga uu ardeygu maqnaanayo dugsiga
- Xaalada waxbarshada ee ardeyga
- fursadaha iyo siyaabo kala duwan oo ardeygu ku heli kari bedelka waxbarashadii ka baaqatey
- Muhiimada aadka ee uu fasaxu u leeyahay ardeyga

Maxaa dhacaya haddii ardeygu ka maqanaado dugsiga waxbarashad, haddii loo diido fasaxa la soo codsadey

Waalidka aan fulin in ilmihiisu guto waajibaadka waxbarashada khasabka ah, waxaa lagu soo rogi karaa amar in uu ilmaha u soo diro dugsiga waxbarashada. Waxaa kale oo dhici karta in amarka loogu daro ganaax lacageed.

Haddii la la diido codsigiina fasaxa, laakiin hadana aad dooarataan in ardeygu ka maqanaado dugsiga waxbarashada, waxaa aan ka degmo ahaan ku wargalin doonaa hay'ada adeega arimaha bulshada. Sababta sidaa loo sameynayo waa waa adiga oo ka waalid ahaan u hogaansami waayey xeerka ku wajahan in ilmahaagu uu ka qayb qaato waxbarashada khasabka ah iyo xuquuqda uu u leeyahay in uu waxbarato isla markaana ay maqnaanshaha uu ilmuhu ka maqanyanay dugsiga waxbrashada ay saameyn ku yeelan karto waxbarashada mustaqbalka ee ilmaha. Waxaa intaas sii dheer in maqanaanshaha loo diiwaan galin doono maqanaansho sharci daro ah.